

Dib-u-dhiska saraha dhaadheer

Macluumaad loogu talagalay
dadka guryahaas deggan

Bisha Janaayo 2026



Dhismaha aad degan tahay dib-u-dhis ayaa lagu sameynayaa si dadka hada degan iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba ay u helaan guryo ka fiican, ka amni wanaagsan, isla markaasna ka raaxo badan kuwii hore.

Waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno oo aad u guurto sida ugu fudud uguna wanaagsan ee suurtoogalka ah.

Shaqaalaha kaala shaqeynaya dib-u-dejinta ayaa hubin doona inaad fahanto xuquuqdaada oo dhan intaadan guurin ka hor iyagoona sidoo kale kaa caawin kara inaad codsato wixii taageero dheeraad ah ee aad xaq u leedahay.



Haddii aad wax suuqo ah qabto, fadlan kala xiriir Homes Victoria **1800 716 866**.

Ballanqaadka aan adiga kuu sameynayno

Waxaa jira waxyaabo muhiim ah oo aan isbedel doonin markaad guurto iyo xuquuqda iyo taageerada aad had iyo jeer heli doonto.



Xuquuqda aad leedahay iyo kirarada sida loo dejin doono waxba iskama badeli doonaan

Gurigaaga cusub waxaad ku heli doontaa dhamaan wixii xuquuq ah ee aad laheed sida uu dhigayo Sharciga Kirada ee Qofka Meesha Degan (Residential Tenancies Act).

Kiradaada waxaa loo qiyaasi doonaa sida ay hadda tahay, iyadoo la aqoonsanayo inaad sidoo kale xaq u yeelan karto Caawinta Kirada Dowladda Federaalka (Commonwealth Rent Assistance).



Waxaad dooran kartaa inaad ku noolaato gurigaaga cusub

Marka la dhameystiro howlaha dib-u-dhiska qasab maaha inaad dib ugu noqoto xaafada aad hadda degan tahay haddii aad ku faraxsan tahay gurigaaga cusub.

Haddii ay habboon tahay, waxaad deganaan kartaa gurigaaga cusub marba adigu hadaad ku qanacsan tahay sida aad hadaba u degan tahay saraha dhaadheer.



Xuquuqda aad u leedahay inaad dib usoo laabato

Waxaad sidoo kale dib ugu soo laaban kartaa xaafada aad hada degan tahay marka dib loo dhiso haddii xaq aad leedahay iyo baahiyahaaga ay isku mid yihiin oo ay guryaha cusubna kugu habboon yihiin.

Guryaha cusub inta eysan diyaar noqon kahor, waan kula soo hadli doonaa si aan u ogaano inaad doonayso inaad dib ugu noqoto xaafadaadii iyo wixii kale ee fursado aad heli karto ah.



In lagaa caawiyo biilasha

Waxaad sii heli doontaa taageerada ka timaadda Dowladda Victoria ee lagaaga caawiyo kharashyada biyaha iyo korontada haddii aad xaq u leedahay.



Xaq-u-lahaanshaha daryeelka iyo taageerada aad helayso waxba iskama badeli doonaan

Dadka kasoo guuraya dabaq ay degan yihiin dad waayeel ah ayaa la taageeri doonaa si loogu xiro Barnaamijka Xiriirka Bulshada ama Barnaamijka Taageerada Guryaha ee Dadka Waaweyn.

Maxaa xiga oo dhici doona?

Dib-u-dhiska lagu sameynayo dhismaha aad degan tahay si loo bixiyo guryo ka wanaagsan kuwii hore waxay qaadan doontaa waqti waxaana loo baahan doonaa inaad guurto. Waxaa jiri doona taageero badan oo aad heli doonto inta ay howluhu socdaan.

Waa kuwan waxa dhici doona bilaha soo socda, iyo waxa aad ka filan karto marxalad kasta.





Bisha Janaayo 2026

Wax loo baahan yahay inaad hada sameyso ma jiraan

Haddii aad su'aalo qabtid, Homes Victoria iyo hay'adaha nala howlgalaya ee Better Health Network iyo cohealth, ayaa laga heli karaa qolka bulshada ee ku yaal dhismaha aad degan tahay. Waxaad ka eegi kartaa darbiga ogeysiisyada lagu soo dhajiyayo ee sar kasta ku yaal wixii ah taariikhaha iyo xilliyada kooxdeena la heli karo, oo ay ku jiraan taageerada turjumaadda.

Haddii aadan imaan karin, waad nala soo xiriiri kartaa:

- booqo **homes.vic.gov.au**
- kasoo wac khadkaeena taageerada **1800 716 866**
- la hadal xafiiska guryaha ee deegaanka.

Howlaha guuritaanka oo xilli hore wax lagaa sii ogeysiinayo

Adiga – ama shaqaalahaaga taageerada ama qof ka tirsan qoyskaaga – ayaa daawan kara muuqaal sharxaya wax badan oo ku saabsan nidaamka guuritaanka haddii aad iskaan gareyso QR koodhka.



Febraayo 2026

Xilli hore ayaan kula soo hadli doonaa

Qoraal ayaan kugula soo xiriiri doonaa si aan kuugu casuumno inaad kasoo jawaabto su'aalo kooban oo laga heli karo online-ka, ama taleefanka laguugu weydiin karo, ama warqad ku qoran, ama si fool-ka-fool ah laguugu weydiinayo.

Hay'adaha caafimaadka ee aan wada shaqyno, Better Health Network iyo cohealth, sidoo kale waxay kaa caawin karaan inaad taas sameyso.

Tani waxay naga caawin doontaa inaan ku siino taageerooyinka saxda ah inta lagu jiro guuritaanka iyadoo aan wax badan ka ogaan doono:

- halka aad jeclaan lahayd inaad degto iyo cidda aad jeclaan lahayd inaad ag dhawaato
- wax khaas ah oo laga yaabo inuu u baahan yahay in loo sameeyo guriga aad degi doonto ee ku xigga
- baahiyahaaga la xiriira gelitaanka ama caafimaadka
- qaabka aad jeclaan lahayd inaad u hesho wixii soo cusboonaado iyo luuqada aad rabto inaad ku hesho
- cidda aad jeclaan lahayd inaad ku xirnaato inta lagu guda jiro howlahan (tusaale, qoyska, daryeelaha, ama shaqaalaha taageerada)

Tani ma noqon doonto foomkaaga rasmiga ah ee la rabo inaad buuxiso markaad guureyso, waa un keliya hab aan ku bilaabi karno inaan qorsheynta baahiyaha bulshadaada.

Waxaad weli haysataa waqti badan oo aad su'aalo nagu soo weydiin karto, sidoo kalena aad noogu soo sheegi doonto haddii ay wax isbeddelaan.



Bisha Maarso ilaa Bisha Maajo (Meey) 2026

Xiriiro joogto ah oo lala yeelanayo bulshada

Waxaan dib u idiin kula wadaagi doonaa xogta aan ka helno bulshadaada. Waxaan sidoo kale idinla wadaagi doonaa macluumaad ku saabsan sida aan xaqiijinayno inaad wax kasta la socotaan, qaabka uu howlwadeenkaaga u qaabilsan howlaha guuritaanka ay kuula shaqeyn doonaan, iyo sidoo kale taageerada iyo guryaha la heli karo nuuca ay yihiin.

Waxaan qaban doonaa kulano loogu talagalay in adiga iyo qoysaskaaga aad macluumaad ku heshaan si aan u hubinno inaad haysato macluumaadka aad u baahan tahay.



Juun 2026

Xarumaha Guuritaanka ayaa furmaya

Xarumaha Guuritaanka waxay furnaan doonaan maalmaha shaqada.

Waad iska imaan kartaa, ama ballan ayaad sii qabsan kartaa, ama waxaad la imaan kartaa qof ka tirsan qoyska ama daryeele si aad ula hadasho kooxdeena.

Xaruntaheena Guuritaanka waxay noqon doontaa meel:

- aad wixii suaalo ah ee aad qabto nagu weydiin karto
- aad ku heli karto talo adiga kuu gaar ah
- heli karto macluumaad daabacan
- aad ka heli karto in lagaaga caawiyo buuxinta foomamka ama sidii aad ku fahmi lahayd fursadaha kuu furan

Shaqaalaha kaa taageeraya howlaha dib-u-dejinta ee adiga kuu heelan

Laga bilaabo bisha Juun 2026, waxaad yeelan doontaa shaqaale kaa taageera howlaha dib-u-dejinta oo adiga kuu heelan kaas oo caawin doona qoyskaaga. Waxay noqon doonaan qofka aad la soo xiriiri karto inta lagu guda jira howlaha guuritaanka.

Si wadajir ah, ayaa waxaad u buuxin doontaan foomka rasmiga ah ee dib-u-dejinta si loo xaqiijiyo baahiyahaaga iyo waxyaabaha aad doorbideyso si aan u helno guri adiga kugu haboon. Waxbana ha welwelin haddii ay xaaladdaadu is beddeshay tan iyo markii u horeysay ee suaalaha lagu weydiiyay, shaqaalahaaga kaa taageeraya dib-u-dejinta ayaa wax walba kuu cusboonaysiin doona.



Bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028

Kulamada dib-u-dejinta, dalabyada, kormeerada, iyo guri ka guurista

In loo helo dadka meesha degan guri cusub guri cusub iyo guuritaanka ayaa u dhici doonta marxalado si taxadar leh loo qorsheeyay si loo hubiyo in dhammaan qoysaska laga caawiyo howlaha guuritaanka ilaa bisha Febraayo 2028.

Shaqaalahaaga kaa taageeraya dib-u-dejinta ayaa ku caawin doona marxalad kasta, laga bilaabo marka lagu raadinayo guri ku habboon baahiyahaaga, iyo markaad soo eegayso gurigaas, iyo sidoo kale markaad ku guureyso guriga iyo degistaada.

Waan heli doonaa waqti aan si wadajir ah isula qorshayno guuritaankaaga waana ku caawin doonaa marxalad kasta oo lagu jiro.



Taageero joogto ah

Inta lagu jiro dib u dejintaada waxaad sii wadi doontaa inaad gasho:

- Xarumaha dib-u-dejinta
- shaqaalahaaga kaa taageeraya dib-u-dejinta ee adiga heeganka kuu ah
- taageerada caafimaadka iyo badqabka iyada oo loo marayo hay'adaha aan wada shaqeyno
- adeegyada turjumaada iyo fasiraadda, haddii loo baahdo

Waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno oo aan ka dhigno guuritaankaaga mid sida ugu sahlan ee ugu macquulsan u dhaca.

Maalin kasta waxaan maqalnaa sheekooyin wanaagsan oo ay nala soo wadaagayaan kireysteyaalka aan ka caawinnay inay u guuraan guryo cusub.

"Aad baan u farxay markii aan ogaaday inaan u guuri karo gurigii aan rabay - sababtuna ma aha oo keliya in gurigu fiican yahay laakiin sidoo kale sababtu waxay tahay waxaan u guuray meeshii igu habooneyd oo ay bulshadeydu daganeyd, dadkii aan muddo badan in naqaanay - deris fiican oo i taageera."

"Waxay ii kireeyeen shaqaale xirfad leh oo dadka rara kuwaas oo shaqadooda aqoon u leh maadaamana ay wax kasta ii habeeyeen, waa ay yaqaaneen bokis kasta meesha loogu talagalay in la dhigo."

"Waxa ugu muhiimsan waa inaad la shaqeyso kooxda dib-u-dejinta. Si wanaagsan ula shaqee oo u sheeg wax kasta oo aad awoodid. Xaaladeyda aad bay mudnaan u siinayeen - waxay ii heleen waqti ay igu arkaan, way i dhageysteen, wayna i fahmeen."

Ioulia, South Yarra

Waan ku faraxsanahay taageerada dib-u-dejinta ee aan helay

"Waxaan halkan ku noolaa 53 sano. Waxaan uruuriyay waxyaabo badan...laakiin wax walba waa ay hagaageen...si fiican baan u degay... waxaan jeclahay apartment-ka...Waa mid aad u wanaagsan - ka wanaagsan intaan filayay."

"Shaqaalaha dadka rara aad bay u fiicnaayeen. Waxay ahaayeen kuwo xirfadoodu sarreyso."

Maureen, Richmond

Waan ku faraxsanahay in lai dejiyay guri cusub oo bulsho/dowlad oo goobta ka ag dhow

"Waxay na dhaheen haddii aad rabto inaad dib ugu soo laabato meeshan waad kusoo laabanaysaa, markaa taasi waan ku farxay. Ma aanan fileyn inay sidan u fiicnaan doonto."

Omar, Ascot Vale

Soo laabashada guuritaanka ka dib



Wax badan ka baro sheekada guuritaanka ee Ioulia.

www.homes.vic.gov.au/news/ioulias-story



Ioulia iyo saaxiibkeed iyo qofka caawiya oo ah Anna.

Guri cusub oo bulsho/dowlad oo ku yaal Flemington

Fursad casri ah, ammaan ah oo raaxo leh oo kaa ag dhow.

Maadaama aan u diyaargarooobeeno inaan dib u dhisno dhismayaasha dhaadheer ee qadiimiga ah ee ku yaal Crown Street, Flemington, guryaha cusub ee ka ag dhow goobta ee ku yaal Holland Court, Flemington ayaa waxay kuu sahlayaan inaad ka ag dhawaan karto goobta iyo waxkasta oo aad hore u taqaanay aadna jeceshahay.

Guryahan sida quruxda badan loo naqshadeeyay waxaa lagu dhisay qaab heerkeedu aad u sarreeyo marka laga hadlayo ammaanka iyo gelitaanka. Kaliya un wax yar oo taraam aad u raacdo ayay u jirtaa guriga aad hadda degan tahay, waxay diyaar noqon doonaan dabayaaqada 2026.

Waxyaabaha cusub oo ay dhismeyaalka la dhisayo yeelan doonaan waxaa ka mid ah:

- Maareeyaha kirada oo goobta ku sugnaan doona
- Dhir (garden) si wanaagsan loo naqshadeeyay iyo meelo banaanka ah oo ay kujirto barxada central park ee cabirkeedu yahay 5000 sqm
- Qolka bulshada iyo kafateeriyada ujeedooyinka badan leh ee la wadaago.





Dhismeyaalka Homes Victoria ee Brighton iyo Flemington waxay sidoo kale leeyihiin astaamahaan iyo tayadan oo kale.

Waxaa la dhisay iyadoo baahiyahaaga niyada lagu hayo

Guryaha cusub waxaa loo naqshadeeyay qaab si sahlan loo geli karo oo nafaas leh. Iftiin fiican oo dabiici ah, hawo-qaadasho iyo mukeyfka ayaa iyaguna ka dhigayo meel lagu raaxeysan karo sanadka oo dhan.

Waxay kaloo leeyihiin meelo wanaagsan oo wax lagu keydiyo, qol gooni kuu ah oo dharka lagu dhaqdo iyo balakoono Sidoo kale waxaa loo naqshadeeyay inay noqdaan kuwo ammaan ah oo la isku halayn karo.

Guryaha waxaa maamuli doona Community Housing Limited oo khibrad u leh maareynta guryaha.

Kiradaada waxaa lagu qiyaasi doonaa sida ay hadda tahay.



Meel ammaan ah oo laga geli karo



Musqulo/qolal qubeys oo la geli karo



Qalabka guryaha la geliyo oo casri ah



Qolalka jiifka oo uu cabirkoodu kala duwan yahay



Balakoono kuu gaar ah



Qalalka dharka lagu dhaqdo oo kuu gaar ah



Inta lagu jiro sanadka 2026 oo dhan waxaan ku casuumi doonaa dadka u guuraya inay soo arkaan guryaha cusub gudahooda.

Marka aad u guureyso guri cusub

Sanadka 2026 waxaad awoodi doontaa inaad soo gudbiso codsi haddii aad daneynayso guryahan cusub.

Haddii aad rabto inaad u guurto guryaha cusub ee ku yaal Holland Court ama aad doorbideyso inaad u guurto guryo bulsho/dowlad ee meel kale ku yaal, waxaan diyaar u nahay inaan kaa caawino inaad hesho guri ku habboon baahiyahaaga.

La soco halka ay marayaan howlaha dib-u-dhiska ee laga wado Holland Court adigoo booqanaya website ka Homes Victoria www.homes.vic.gov.au/precincts/flemington-precinct



Cidda aad la hadli karto

Su'aalaha ku saabsan guuritaankaaga ama howlaha dib-u-dhiska

Homes Victoria

Homes Victoria waa qayb ka mid ah Waaxda Goysaska, Cadaaladda iyo Guryeynta. Waxaan maamulnaa guryaha dadweynaha ee Victoria.

Sidoo kale waxaan maamulnaa dib-u-dhiska ku socda dhismayaasha dhaadheer ee qadiimiga ah isla mar ahaantaasna waxaan taageerna dadka guryahaas deggan inta lagu jiro guuritaanka.

Haddii aadan hubin cidda aad la xiriiri lahayd, nala soo xiriir annaguna waxaan kugu xidhaynaa qofka saxda ah.

☎ 1800 716 866

✉ enquiries@homes.vic.gov.au



Iskaan garee si aad ugu akhrido dukumintigan luqaddaada



Taageerada caafimaadka iyo badqabka

Hay'adaha caafimaadka ee nala shaqeeya ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida baahiyahaaga caafimaad loo taageeri doono inta lagu jiro guuritaanka.

cohealth

☎ 0460 929 176

🌐 cohealth.org.au

Taageerada ah xuquuqda ay leeyihiin dadka guryaha degan

Kirada Victoria - macluumaadka kirada iyo sharciga

☎ 1800 068 860

🌐 www.tenantsvic.org.au

Ururka Kiraystayaasha Dadweynaha Victoria (Victorian Public Tenants Association) - u doodis iyo taageero

☎ 1800 015 510

🌐 www.vpta.org.au

Xarumaha sharciga bulshada - caawimaad sharci oo lacag la'aan ah, waxkastana ay sir kuu yihiin

Ka hel xarunta sharciga bulshada ee deegaanka www.fclc.org.au/find_a_community_legal_centre